Wanaagsantahay in laga warhaayo

# Tallaalada

Folkhälsomyndigheten

**Dhammaan carruurta ku nool Iswiidhan waa lagu martiqaadi tallaalo quseyo labo iyo toban cuduro oo halis ah. Tallaaladas waa mid aad u madax bannaantahiin iyo waa bilaash oo adiga wax lacag ma ku bixineysid.**

Carruurta yar waxaa tallaaladooda lagu siin ruugta caafimaadka carruurta [BVC] ilaa iskuul ka bilaabaayaan, iyo markas kadib tallaalka waxaa siin kooxda caafimaadka ardeyda [elevhälsan].

Cudurada qaarkood oo kamid ah qorshaha waxyaabaha carruurta laga tallaali Iswiidhan caadiyan kuma ahan laakin wadamo kale oo laga helo baa jirto. Tallaalka waa sida ugu wanaagsan canuga looga difaacikaro cuduradan.

### TALLAALADA RUUGTA CAAFIMAADKA CARRUURTA

- **Lix isbuuc canuga marka uu jiro.** Tallaalka koowad wuxuu ka difaaci faayraska sababta u ah shubanka [rotavirusinfektion].
- **Saddex bilood canuga marka uu jiro.** Tallaalka labad oo ka difaaci faayraska sababta u ah shubanka [rotavirusinfektion]. Waa xilligan marka canuga la siin tallaalka koowad oo toddobo cuduro kale: cudurka cumaha ku dhaco [difteri], teetano [stelkramp], xiiq dheer [kikhosta], cudurka dabaysha [polio], bakteeriyada sababto xanuunka dhegta [Hib], bakteeriyada sababto xanuunka ku dhaco xubnayaasha laga neefsado [pneumokocker] iyo cagaarshow nooca B [hepatit B].
- **Shan bilood canuga marka uu jiro.** Waxaa mar labaad la siin tallaaladii oo toddobada cudur oo canuga la siiyay kulankii hore, markuu canuga jiray saddex bilood.
- **Hal sano canuga marka uu jiro.** Tallaalka saddexaad oo toddobada cudur oo canuga la siiyay marka uu jiray saddex bilood iyo shan bilood.
- **Hal sano iyo bar canuga marka uu jiro.** Tallaalka iska difaacida jadeeco [mässling], cudurka sababo xanuun oo daamanka ku bararin [påssjuka] iyo faayraska sababo cudur jirka u yeeli finan yar yar [röda hund].
- **Shan sano canuga marka uu jiro.** Tallaalkale oo cudurka cumaha ku dhaco [difteri], teetano [stelkramp], xiiq dheer [kikhosta] iyo cudurka dabaysha [polio]. Tallaalkan waa kan ugu dambeeyo oo canuga laga siin ruugta caafimaadka carruurta [BVC].

### TALLAALADA KOOXDA CAAFIMAADKA ARDEYDA OO ISKUULKA

- **Fasalka 1 ilaa 2.** Tallaalka labad oo iska difaacida jadeeco [mässling], cudurka sababo xanuun oo daamanka ku bararin [påssjuka] iyo faayraska sababo cudur jirka u yeeli finan [röda hund].
- **Fasalka 5aad.** carruurta dhigata dhammaantood waxa la siinayaa laba tallaal oo dhan ka ah cudurka humant papillomvirus oo ah cuduro badan oo isku jira. Tallaalka HPV-ga waxa looga tallaalayaa si looga hortago inuu ku keeno cudurka kansarka.
- **Fasalka 8 ilaa 9.** Tallaalka shanaad oo iska difaacida cudurka cumaha ku dhaco [difteri], teetano [stelkramp] iyo xiiq dheer [kikhosta].

### MARKA AAD JOOGTID RUUGTA CAAFIMAADKA CARRUURTA

Warbixin ka sii kaalkaalisada oo joogto BVC sida uu yahay caafimaadka canugaaga wakhtigaas la joogo. Su'aalo weeydii iyo kala hadal haddii ey jiran waxyaabo aad ku fikireysid.


Tallaalada inta ugu badan qofka cirbad ahaan baa loo siin, iyo cirbada qofka wuu dhibsankara. Kaalkaalisada joogto BVC baa adiga ku tusin sida aad u heyneysid canugaaga markaa la siin tallaalka.

### MARKA AAD JOOGTID ISKUULKA

Iskuulka waxaa canugaaga siin tallaalada kaalkaalisada iskuulka. La hadal asaga ama ayada haddii adiga iyo canugaaga su'aalo aad ku fikireysin ey jirto.

## BARNAAMISHKA TALLAALIDA OO ISWIIDHAN

Meeshan baa ka arki adiga tallaalada dhammaan carruurta Iswiidhan lagu martiqaado, sida looga hortago cudurada halista.




FOLKHÄLSOMYNDIGHETEN 2023 ARTIKELNUMMER 23175-5

# Cudurada canugaaga difaaca ka helaayo

Halkaan baa waxaa ka akhrisankarta warbixin kale oo ku saabsan cudurada kamid barnaamishka tallaalida iyo canugaaga heli difaac haddii laga tallaalo.

**Faayraska sababta u ah shubanka [Rotavirusinfektion]** waa infekshanka calool xanuunka oo sababta u ah in carruurta shubman, matagaan iyo jirkooda qallalo. Marmar canuga wuxuu ubaahnan kara in isbitaalka la jiifiyo oomeeshas daryeel caafimaad lagu siiyo.

**Cudurka cumaha ku dhaco [Difteri]** waa cudur si fudud u faafo iyo infekshan luqunta halis u ah oo dhaawac halis u geysankaro wadnaha, kiliyaha iyo habka-dareemayaasha jirka.

**Teetano [Stelkramp]** iwaxaa sabab uah bakteeriya oo ku nool ciida iyomindhicirada xayawaanka. Canugawaa ku dhicikarta teetano haddiixayawaan qaniino ama meel nabarah wasaq ka noqoto. Canuga markaswaxaa ku dhici muruq kogid iyo iyowaxaa ka adkaan inuu wax liqo iyoneefsado. Teetano ma'ahan waxa laboqof oo bina'aadan ey kala qaadikaran.

**Xiiq dheer [Kikhosta]** waa cudur si fudud u faafo iyo qofka ku ridi qufac aad u culusiyo qufac qofka haynkaro dhowr bilood. Carruurta hada dhashay wuxuu ku noqonkara cudur noloshooda halis galiyo.

**Cudurka dabaysha [Polio]** cwuxuu dhaawici habka-dareemayaasha jirka iyo sabab u noqon qofka inuu curyaamo iyo dhaawac noloshiisa ka soo fiicnaaneyn.

**Bakteeriyada sababto xanuunka dhegta nooca B [Haemophilus influenzae typ B (Hib)]** wuxuu sabab u noqonkara infekshano halis, qaasatancarruurta ka yar shan sano. Hib wuxuusabab u noqon infekshanka maskaxda oohalis noqonkaro ama keenikaro dhaawacqofka noloshiisa ka soo fiicnaaneyn.

**Bakteeriyada sababto xanuunka ku dhaco xubnayaasha laga neefsado [Pneumokocker]** wuxuu carruurta ku ridaa infekshanka dhegaha iyo sanqada, iyo xita cuduro ka sii halis badan sida infekshanka ku dhaco sambabaha, dhiig sumayn iyo infekshanka xubinta ku daboolan maskaxda.

**Jadeeco [Mässling]** waa cudur si fudud u faafo iyo qandho aad u badan qofka ku ridi, qufac iyo maqaarka jirka baa wax uga soo bixi. Carruurta waxey ka sii qaadikaran cuduro kale sida infekshanka xubinta ku daboolan maskaxda, infekshanka dhegaha iyo infekshanka sambabaha. Marmar qofka jadeecada buu u dhiman.

**Cudurka sababo xanuun oo daamanka ku bararin [Påssjuka]** waa cudur si fudud u faafo iyo saameyn qanjidhka abuuro candhuufaha, laakin ka sii qaadikarta cuduro kale sida infekshanka xubinta ku daboolan maskaxda iyo infekshanka maskaxda. Wiilasha waxaa ku dhici infekshan xiniinyaha.

**Faayraska sababo cudur jirka u yeeli finan yar yar [Röda hund]** waa caadiyan infekshan fudud, laakin haddii dumar uur leh ku dhaco waxaa halis ah in canuga ka soo dhaco ama canuga dhasho asagoo dhaawacan is halis ah.

**Faayraska la dhaho [Humant papillomvirus (HPV)]** waa infekshan ku dhaco maqaarka iyo qaybaha jirka ee shida balqanka. Infekshanka ma'ahan mid qofka caadiyan iska dareemi oo waa mid iskiis u reysan laakin haddii uusan reysan wuxuu badali unug jirka ka suubsanyahay iyo luqunta makaanka ku ridi kaansar iyo noocyo kale oo kaansar nolosha dambe.

**Cagaarshow nooxa B [Hepatit B]** wuxuu sabab u noqon infekshanka ku dhaco beerka. Dadka inta ugu badan infekshanka weey ka fiicnaan iskood, laakin marmar faayraska jirka buu ku sii jiri iyo wuxuu dhaawici beerka ama sababi in beerka kaansar ku dhaco. Halista arrintan waxey aad u weeyntahay haddii qofka lagu daarto marka uu canug yahay.

Dhammaan tallaalada qofka la siiyo oo kamid ah barnaamishka tallaalada waxaa laga diwaangalin liiska guud qaranka oo tallaalada oo Hey'adda arrimaha caafimaadka [Folkhälsomyndigheten]. Diwaangalinta baa waxey fududeyn in dabagal lagu suubinkaro haddii barnaamishka tallaalada noqdan sidii loogu talagalay.

---

**Miyaa dooneysaa warbixin kale?**
Fadlan adiga ku soo dhawoow oo la soo xiriir ruugta caafimaadka carruurta ama kooxda caafimaadka ardeyda oo iskuulka canugaaga dhigto.

SKYDD FÖR LIVET